



Waalid ahaanshuhu waxay noqon kartaa mid adag...
...caawimaada iyo taageerada ayaa keeni kara isbedel dhab ah.

Waa maxay barnaamijka mustaqbalada fiican?

Barnaamijka mustaqbalka fiican (Brighter Futures Program) wuxuu ku siinayaa adeegyo iyo taageero kaa caawinaya inaad siiso carruurtaada bilow wanaagsan oo nololeed. Tani waxay joojin kartaa inaysan dhibaatooyinku sii xumaan.

Adeegyada laga heli karo barnaamijkan dhexdiisa waxaa ka mid ah xannaanada carruurta, playgroups, booqashooyinka guriga iyo kooxaha waalidiinta. Ku soo biirida barnaamijku waa ikhtiyaari.

Waxaan dhamaanteen dooneynaa in carruurteenu ay noqdaan kuwo faraxsan. Caafimaad qaba oo amaana. Barnaamijka Mustaqbalada Wanaagsan wuxuu taageeraa qoysas fara badan.

Qoysaska qaarkood waxay la halgamaan dhibaatooyinka khamrada iyo daroogadu keenaan kuwa kalena waxaa heysta shaqaaqada qoyska. Waalidiin badan taageero kama helaan qoyska ama saaxiibadood isla markaasna waxay ku noqotaa waalidnimadu mid adag.



Barnaamijkan miyaa laygu talagalay?

Warbixin la siiyey Khadka taleefanka ee DoCS oo ku saabsan carruurtaada ayaa ku talinaya in qoyskaagu uu aad ugu baahan doono caawimaad barnaamijkan.

Waad nagala hadli kartaa sidaad ula qabsaneysid waalidnimada iyo haddii aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo wax dhibaato ah oo ku heysta.

Barnaamijka mustaqbalka fiican wuxuu kaa caawinayaa inaad hesho adeegyada aad u baahan tahay.



“Waxaan ahay hooyo keliya oo heysata saddex carruur ah oo ka yar

sideed sanno. Ma leh wax qoys ah oo meel ii dhow ku nool, waana welwelsanaa sababtoo ah lama qabsaneynin carruurteyda wax badan ayaan bannaanka u kaxeyn jirey. Hadda waxaan heystaa qof igu soo booqda guriga afar jeer toddobaadkii yeelashada saaxiib aan dhageysto isbedel weyn ayey ku sameysay noloshayda. Carruurteydu sidii hore aad ayey uga farxad badan yihiin waxaana heystaa cid aan la hadlo marka arimuhu igu adkaadaan.”



...caawimaada iyo taageerada ayaa keeni kara isbedel dhab ah.

Sidee buu u shaqeeyaa barnaamijku?

Shaqaalaha Mustaqbalka Fiican ayaa kaala hadli doona wax ku saabsan waxa u shaqayn kara qoyskaaga iyo waxa idinku adag. Waxaad ka hadli kartaa taageerada aad heysato iyo dhibaatooyinka aad dooneyso inaad u hesho xal iyo sidaad u kala horeysiineyso.

Inagoo wada jirna ayaan qoysheynaynaa adeegyada iyo taageerada ku fiican qoyskaaga.



“Waxaan had iyo jeer u heystay in Sam uu si ula kac ah uu

isugu dayeyey inuu iiga xanaajiyo markuu dabeecad xumada muujiyo umana arko wax weyn sidii aan kula dhaqmay isaga. Ka dibna markii aan tegay barnaamijka waalidnimada waxaan bartay in wuxuu sameeyo ay yihiin wax caadi ah. Waxay I bareen siyaalo aan kula qabsado oo aan ula dhaqmo dabeecada Sam si ka fiican meeshii aan ka xanaaqi lahaa ee aan isaga kula boodi lahaa.”



“Xaaskeyga ayaa isticmaali jirtay daroogo xal kalena

ma haysan oo aan ka aheyn inaan kaga tago carruurta iyada markaan shaqo aado. Waxaan ka welwelsanaa waxaa ku dhici doona waxaana ku fekeray inaan ahay waalid xun. Shaqaalaha Mustaqbalka Fiican ayaa eegay waxyaalaha aan ku fiican nahay qoys ahaan oo iga caawiyey inaan carruurteyda u helo xannaanada carruurta xaaskeygana geeyo dhaqancelinta.”



NSW Department of
Community Services



New South Wales Government

Dadka sawirka qoraalkan ka muuqdaa waa tusaale ahaan keliya.

Barnaamijka Mustaqbalka Fiican (Brighter Futures Program) waa iskaashi wadajira oo u dhaxeeya Adeegyada Wasaaradda Bulshada ee NSW iyo wakaaladaha aan dawliga ahayn si ay u siiyaan adeegyo soo dhexgal ah qoysaska NSW.

© NSW Department of Community Services
(Wasaaradda Adeegyada Bulshada ee NSW)
4 - 6 Cavill Avenue
Ashfield NSW 2131
(02) 9716 2222
www.community.nsw.gov.au